

Dhimista qiimaha ay waaliddiinta ku bixiyaan xannaanada carruurta/SFO laga bilaabo jannaayo 2021

XANNAANADA CARRUURTA

Dhimista qiimaha ay bixinayaan guryaha uu dakhligooda ka hooseeyo 592 167 karoon sanadkii

Dadka wada deggan guri uu dakhligiisa sanadlaha ah ee wadareed ka hooseeyo 592 167karoon, waxey codsan karaan in laga yareeyo kharashka waaliddiinta ay ku bixiyaan xannaanada carruurta. Xusuuso inaad ilmo walba goonidiis ugu codsato haddii aad leedahay dhowr ilmood.

Waxaa dheer in xilliga nuxurka [kjernetid] bilaash u yahay guriyaha uu dakhligooda ka hooseeyo 505 083 karoon sanadkii

Xilliga nuxurka oo bilaasha ah waxaa laga wadaa in ilmaha uu xannaanada carruurta joogayo 20 saacadood oo bilaash ah usbuucii. Waxaa xilliga nuxurka bilaash uu kuu noqonayaa laga bilaabo bisha ogoosto ee sanadka uu ilmahaagu buuxiyo labo sano. Haddaad codsato in lagaa yareeyo qiimaha uu waalidku bixiyo, waxaa si otomaatik ah bilaash lagaaga dhigayaa xilliga nuxurka haddii dakhliga gurigaagu uu ka hooseeyo 566 100 karoon sanadkii.

SFO

Dhimista qiimaha ay bixinayaan guryaha uu dakhligooda ka hooseeyo 505 083 karoon sanadkii

Dadka wada deggan guri uu dakhligiisa sanadlaha ah ee wadareed ka hooseeyo 505 083 karoon, waxay codsan karaan in laga yareeyo kharashka waaliddiinta ay ku bixiyaan SFO.

SFO bilaasha ah waxaa helaya guryaha dakhligooda uu ka hooseeyo 350 000 karoon sanadkii

Haddii aad codsato in lagaa yareeyo kharashka SFO, waxaad si otomaatik ah u helaysaa SFO bilaash ah haddii ilmahaagu uu dhigto fasalka 1-aad, dakhliga gurigana uu ka yar yahay 350 000 karoon sanadkii.

Sidan ayaad u codsaneysaa

Si elektaroonig ah ayaad u codsaneysaa. Ku lifaaq dukumiinti sax ah. Waxaad ka galaysaa ID porten (Bank ID, Min ID, iwm) si aad u codsato.

Foomka codsiga xannaanada carruurta halkan ayaad ka heleysaa:

www.bergen.kommune.no/redusertbetalingbarnehage

Foomka codsiga SFO halkan ayaad ka helaysaa:

www.bergen.kommune.no/redusertbetalingSFO

Carruur ma kuu dhigtaan xannaanadda carruurta iyo SFO-ga?

Markaas waxaad dooranaysaa *Søknadsskjema- Redusert foreldrebetaling barnehage og skole*. Waxaad ka helaysaa *Søknadsskjema* hoosteeda marka aad gujiso mid ka mid ah link-yada kore.

Maxaa noqonaya caddaymo sax ah:

- Canshuur-celintii 2020 ee dadka waaweyn ee guri la deggan ilmaha waa in la soo raaciyo
- Haddii isbeddel weyn xagga dakhliga uu jiro taasina aysan ku caddeyn canshuur-celinta, waxaad ku soo lifaaqi kartaa warqadaha mushahaarka ee seddexdii bilood ee ugu dambaysay.
- Haddii shaqada lagaa fadhiisiiyay [permittert], waxaad ku lifaaqi kartaa caddeymaha shaqa-bixiyahaaga.
- Go'aanka caawinta khasnadda amaahda waxbarashada iyo caddaynta ardaynimada
- Go'aan caawinta bulshada ee NAV/go'aankii caawinta bulshada ee NAV oo la joojiyay
- Haddii aad jawaab ka sugaysid NAV waa inaad taas soo caddaysaa
- Caddeymo kale oo ku saabsan dakhligaaga wakhtiga xaadirka ah

Ma haysto canshuur-celin:

Dadka sanadki ugu dambeeyay Norway deggenaa oo dhan waxay heystaan canshuur-celin waana in lagu lifaaqo codsiga. Haddii aad mar dhow timid Norway oo aadan heysannin canshuur-celin, waa innad ku lifaaqdo caddeyn inaad sharci ku leedahay Norway.

Codsiga goormee laga billabayaa:

Codsiga dhimista kharakhka waaliddiinta waxaa laga bilaabaya bisha codsiga la helay kaddib. Marka codsiga la oggolaado ayaa go'aanka lagu soo dirayaa. Haddii uu ilmuhu dhigto xannaano carruur oo barayfat ah, nuqulka go'aanka ayaa xannaanaddaas carruurta loo dirayaa.

Ma lihi nambarka shakhsiga [personnummer]/elektaroonig ahaan uma codsan karo:

Waxaad la xidhiidhi kartaa degmada Bergen, adeegga dadweynaha ee ku yaalla Kaigaten 4, si lagaaga caawiyo codsiga elektaroonigga ama inaad warqad ahaan u codsato haddii aadan lahayn nambarka shakhsiga. Horay u soo qaado aqoonsi sax ah iyo caddeymaha codsiga. Lambarka adeegga dadweynaha waa 55 56 55 56.

NB! Xusuuso in aad codsato sanad walba!

Waa inaad dirto codsi cusub sanad walba si lagaaga dhimo kharashka ay waalidku bixinayaan. Goor hore codso. Codso bisha juun si aad u hesho qiimo-dhimis bisha ogoosto.